®

Mabaadi'da Xisbiga

National Union Party
Political Platform
Heshiis ▸ Midnimo ▸ Qaranimo

Tusmada Mabaad'ida Xisbiga:

Hordhac 3
Maamul Xumo 5
Nidaamka Awood Qeybsiga 4.5 6
Qabyaalad 7
Tiirarka Xisbiga Midqaran 9
Tiirka Koowaad: Sugidda Xuquuqda Shakhsiga 10
Tiirka labaad: Amniga 10
Amniga Xukuumadda: 11
Amniga Bulshada: 12
Amniga Shakhsiga: 13

Xallinta khilaafaaka iyo la dagaalanka xagjirka 14
Tiirka Saddexaad: Cadaaladda 17
Tiirka 4aad: Adeegga Bulshada 19
Waxbarashada 21
Caafimaadka 24
Haweenka 25
Qaadka 26
Tiirka 5aad: Kobcinta Dhaqaalaha 27
Ganacsiga 29
Iswaafajinta Miisaaniyadda Qaranka iyo Siyaasadda Dowlaada. 29
Ilaalinta Bay'ada iyo Deegaanka 30
Beeraha 31
Kaluumeysiga 32
Xanaanada xoolaha 33
Macdanta iyo Shidaalka 34
Tiirka 6aad: Siyaasadda 35
Dhameystirka Dastuurka 35
Dib-U-Heshiisiin Dhab Ah 36
Nidaamka Federaalka 37
Maqaamka Magaaalada Muqdishu 38
Laamaha Dowladda 39
Xal-uhelidda qadiyadda walaaleheen ee Somaliland 39
Xiriirka Caalamka 40
Xisbiyada Siyaasadeed 41
Bulshada Rayidka 41
Saxaafadda 42
Tiirka 7aad: Maamul Wanaagga 43
Dib-U-Habeynta Hay'adaha Dowladda 43
La dagaalanka Musuqmaasuqa 44

Hordhac

Xisbiga MIDQARAN waa xisbi heer qaran oo ka diiwaan gashan Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinka Qaranka oo afka qalaad looo yaqaan "National Electoral Independent Commission" ee Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya. Xisbugu waxa uu u taaganyahay in la gaaro **Qaran Soomaaliyeed** oo **MID** ah oo ay dadkiisu ku wada noolyihiin cadaalad, nabad-galyo, iyo walaaltinimo sida ay ula jaanqaadan shucuubta caalamka kale una hormariyaan wadankooda.

Dalka waxa uu mudo dheer kusoo jiray colaad iyo dhibaatooyin badan oo laga dhaxlay mudadii dheereed ee dowlad la'aantu ka jiraty Soomaaliya, dad badan-na ay aaminsanyihiin in dhibaatadu ka horreeysay xilligii burburka dowladnimada Soomaaliya kana dhalatay cadaalad daro badan, eex iyo qof-jecleysi laga tirsanayey maamuladii hore ee dalka soo maray. Mudo ku dhow 28 sano muwaadiniinta Soomaaliyeed ma helin adeegyada bulshada ee aasaasiga ah ee looga baahanyahay in Dowladi shacabkeeda u qabato sida sugidda amniga, ilaalinta xuquuqda shaksiga, gaarsiinta adeegyo waxbarasho, caafimaad iyo shaqa abuuris u suurtageliya in qof walba oo Soomali ah ku nolaado nolol sharaf leh, iyada oo si hufan bulshada wax loogu qabanaayo canshuurta ay muwaadiniintu bixiyaan, sidoo kale la ilaaliyo kalsoonida canshuur bixiyaha. Xaaladahaasi waxay horseeday in ay sii wiiqdo kalsoonida shacabku ay ku qabaan dib u abaabulidda iyo dhismaha dowladooda.

Xisbiga MIDQARAN waxa uu aaminsanyahay mabda'a ah in dib loo hanto kalsoonida shacabka, la dhiso dawlad mug iyo tayo leh oo ay dowladdu ugu shaqeyso shacabkeeda si daacad iyo sinnaan. Si taasi loo helo waxa lagama maarmaan ah in la hirgeliyo hay'ado tayo leh oo la yimaada si rasmi ah shaqo ku saleeysan hawlkarnimo iyo hufanaan tasoo haqab tirta baahida balaaran ee bulshada Soomaaliyeed, islamarkana gaarsiisa horumarka weyn oon tigsaneeno.

Dibudhaca ku yimid Qaranka Soomaaliyeed waxaa inta badan keenay qodobdan soo socda:

1. Cadaalad darro
2. Qabyaaladda
3. Musuqmaasuqa
4. Nidaamka awood Qeybsiga ee 4.5
5. Maamul Xumo
    a. Isbeddelada Degdegga ah ee maamulka Xukuumada
    b. Maqnaanshaha machadka tababaridda shaqaalaha dowladda.
    c. Shuruucda mamul wanagga oo aan la dhameystirin kuwa qorana aan la raacin.
    d. Kobcin la'aanta iyo tababaryarida haykalada shaqaalaha dowladda.
    e. Mudnaan siin la'aanta hay'adaha wax soo saarka dalka sida beeraha, xoolaha, kaluumeysiga, macdanta iyo biyaha.



Maamul Xumo

Soomaaliya waxay ka dhaxashay nidaam xumo dowladeed iyo kutakrifal awoodda dowladda dowladihii gumeysiga ee dalka soo maray kuwaas oo xoog iyo maquunin ku haystay umadda Soomaaliyeed. Isku day maamul dowladeed oo dimuqaraadi ah wuxuu dhacay sanadihii 1960- 1969 oo uu dalku yeeshay maamul dowladeed oo si sharci ah loo soo doortay iyo nidaam dawladeed oo keenay Soomaliya in ay ku tilmaanneed nidaam dowladeed oo deggan iyo xukuumad, gole shacbi iyo gole garssor oo isu dheelitiran.

Hase ahaatee waxaa nidaamkaasi hoosta ka soo guraayey oo cirib guraayey nidaam daahsoon oo qabyaaladeed iyo musuqmaasuq ba'an oo laga dhaxlay gumaysigii soo maray dalka.

Hadaba nidaamkaas qabyaaladda iyo musuqmaasuqu daahsaday waxa ay keeneen in ay wiiqanto kalsoonidii ay shacbigu ku qabeen dowlad ay iyagu leeyihiin. Xisbiga MIDQARAN waxa uu aaminsanyahay in soo celinta kalsoonida shacabka ay sal-

dhig u tahay dowlad dhisidda Soomaaliya, sida lagu soo celin karana ay tahay in la helo dowlad iska fogeeysa musuqmaasuqa, eexda iyo qof-jecleysiga, sidoo kalena ilaalisa xorriyadda shakhsiga muwaadinka iyo lahaanshaha hantida gaarka loo leeyahay.

Nidaamka Awood Qeybsiga 4.5

Waxaan shaki ku jirin in sadbursi ku dhisan shakhsi iyo qabyaalad ba'an uu ka jiray haddana ka jiro Soomaaliya oo ay Soomaali badan xuquuqdooda lagu duudsiyey. Xukuumadihi isaga dambeeyey Soomaaliya ma aysan tixgelin in shacabka Soomaaliyeed oo dhan la tixgeliyo marka la qeybinaayo khayradka dalka ama kobcinta dhaqaale loo sinaado degmooyinka iyo gobollada. Mudadii burburkii qaranku jiray ayaa la keenay barnaamij xal loogu raadinaayo khaladaadkaas oo loogu magac daray nidaamka awood qeybsiga 4.5. Nidaamkani sida ay u fasireen Soomaalidii ka qeybgashay ansixintiisa waxay yiraahdeen: Xaq Maahan ee waa Xal.

Walow nidaamka 4.5 u muuqdo mid Soomalida oo dhan ay iska dhex arki karto awood qeybsiga dalka, haddana waxaa nasiib darro ah in nidaamkaani u nogul yahay qabyaaladda, musuqmaasuqa oo shakhsi waliba midka uu ka liito lagu keeno hab beeleed, iyo siyaabo kale oo musumaasuq ah oo ay hormuud ka yihiin oday dhaqmeed iyo siyaasiyiin aan horumarinta maamulka dowladda iyo ilaalinta hawlaha qaranka aqoon iyo ahmiyad u lahayn. Nidaamkaas wuxuu horseeday dowladxumo baahsan iyo dad aan dowladnimo ehel u ahayn oo ku fadhiya kuraas aysan aqoon iyo karti midna u lahayn oo ay ku joogaan waa qeybtii ku soo aadday beesheena. Shaki kuma jiro in beel walba ay leedahay dad karti iyo aqoon leh oo dowrkaas si sharaf leh u buuxin kara, hase ahaatee hab beeleedka ayaa ku dhisan isu dheelitir beel, qancin iyo boos ka riixasho oo keentay aqoon yahan badan in ay banaanka ka joogaan barnaamijkaan ku meel gaarka ah oo u horseeday Soomalia dib udhac dowladnimo oo u baahan muddo dheer si looga soo kasbado.

Xisbiga Midqaran wuxuu ku baaqayaa in la soo celiyo nidaam awoodqeybsi oo tixgelinaaya aqoon, karti iyo mudnaan hawl oo ku saleeysan isu dheelitirka shacabka Soomaaliyeed oo si cadaalad ah wax loogu qeybiyo oo la tixgeliyo shacabka qeybihiisa kala duwan sida: haweenka, dhalinyarada, dadka aan ka muuqan dowladda iwm.



Qabyaalad

Shacabka Soomaaliyeed waxay ka soo wada jeedaan qabaa'il Soomaliyeed oo kala duwan. Qabiilku sida diinntu na bartay ceeb ma laha ee waa laysku aqoonsadaa, ee waxa nabigeena Muxammad SCW uu yiri "Qabyaaladda isaga hara, waa qurmeeysaa ee" ama sida uu nabiga u yiri SCW.

Qabyaaladdu waxay keentaa bulsho kala sooc, eex, tixgelin gaar ah oo dadka qaar la siiyo, qaarna la siin, iyo ku takri fal awood oo loo adegsanaayo dadka qaarkood sababo aysan waxba ka ogeyn oo qabiil ahaan lagu takooraayo. Qabyaalddu waxay ka hor imaaneeysaa nidaamka sinnaanta shacabka oo ku saleeysan in shakhsigu ama

muwaadhinku yahay xubinta ugu muhiimsan ee bulshadu ka kooban tahay mudaanna qadarin muwaadhin oo aaneey hab qabiil ama koox ama isbahayesi si kale ku yimid uusan xaqiisa duudsiin karin.

Si xadaaradda ummadda Soomaliyeed iyo kobacooda bulsho iyo dhaqan-dhaqaale uu Geeska Africa iyo adduunkaba uga muuqdo lagana qadiriyo, waa in heeryada qabyaaladda la tuuraa, oo si dhab ah loo turaa. Kala qoqobka bulshada oo ay qabyaaladdu leedahay wuxuu ku dhisan yahay tartan hoose oo aan fiiro dheer lahayn iyo isreeb-reeb xasad aan ka marnayn oo marka ugu dambeeysa iyagoo dhan ay ku guul darreeystaan.



Ummad horumar iyo guul ma gaari karto hadaaneey ku bahoobin fikrad mideeysa oo ay isu kaashadaan, danahooda kuwada fushadaan, cadowga dibedda kaga yimaadana kaga hortagaan. Fekerkaasu wuxuu noqon karaa mid dowladeed oo ay muwaadhinka oo dhan ku walaaloobaan oo ay maslaxadooda iyo mustaqblakooda ku ilaashadaan. Muwaadhinku waa inuu ku kalsoon yahay xeyndaabkaas dowladnimo oo uu ku dhex jiro, oo guulaha la gaaro ku farxo ayna saameeyso, dhibaatooyinka soo gaarana uu ka xumaado. Muwaadhin aan dalkiisa ku faraxsaneeyn ama aan raali ku ahayn wuxuu horseedayaa dhibaatooyin khatar guud geliya qarannimada iyo wadajirka umadda.

Si kalsoonida ay shacabku ku qabaan dowladda loo xaqiijiyo, heerka nolosha ee bulshadana kor loogu soo qaado, dowlad ay hogaamiso Xisbiga MIDQARAN amaba ay ka mid tahay maamulkeeda waxay dajineysaa nidaam maamul oo bisil oo salkeedu ku qotoma todobadan tiir ee hoos ku cayiman:



Xisbiga MIDQARAN waxaa uu ku shaqeeynayaa aragtida ku saleysan nidaamka talowadaagga ee shuurada ama afka qalaad loo yaqaan dimoqoradiyada waafaqsan Diinta Islaamka oo leh matalaad oo ay dadku si xor ah u soo dooranayaan qofka ay rabaan inuu matalo dantoodana oo ay u arkaan inuu ka shaqeynayo una gudanaayo shaqada dowladana si karti iyo hufnaan ku jirto, qofkasoo iyadoo matalaya dadka soo doortay. Dimoqradiyada Soomaaliya marka si kale loo dhigo waa “shuuro/Talowadaag” oo aan ahayn kelitalis, taladana ay ka wada dhaxeeyso. Tusaale, Golaha Shacabka waa gole ay ku kulansan yihiin dad matala shacabka Soomaaliyeed oo u doodaaya xuquuqdooda, ilaaliyaana maslaxadda guud ee Umadda Soomaaliyeed.

Tiirarka Xisbiga Midqaran

Nidaam maamul kasta ee jira waa in uu leeyahay mabaadi’ uu ku qotomo oo muhiim ah oo hawlaha dawliga ah ee la qabanaayo iyo ujeedooyinka guud ee laga leeyahay, iyo sababta qexeysa muhiimadda qabashada hawlahaasi. Taasi waxay horseedeeysaa in hawlwadeenada maamulka dowladda ay dareemaan muhiimadda hawlahooda iyo mabaadi’da u baahan in marwalba la ilaaliyo taas oo iftiimineeysa isla markaana fududeeyneeysa adeegga bulshada.

Tiirka Koowaad: Sugidda Xuquuqda Shakhsiga

Shakhsiga waa unugga uu ka bilowdo bulshada oo tasi macnaheedu yahay marka shakhsiga xuquuqdiisa muwaadinnimo la sugo oo uu helo iyaddoon baryo iyo buuq midna ku jirin ayaa bulshadu guud ahaan xuquuqdeeda heshaa. Amni, adeeg bulsho, gudasho hawl shakhsi ama mid qaran waxay salka ku haysaa iyadoo xuquuqda shakhsiga la dhowro lanatixgeliyo. Ku xadgudubka xuquuqda shakhsiga waxay khatar ku tahay mamul wanaagga, wadaninimada, midnimada iyo qaranimada ummadda Soomaaliyeed. Hay'adaha dowliga ah waa in ay tixgelin gaar ah siiyaan xuquuqda shakhsiga oo loo ogolaadaa. Dowlad uu hogaamiyo MIDQARAN waxa ay tixgelin gaar ah siineysaa xuquuqda shakhsiga oo ay ka mid tahay balse aanan ku koobneyn:

1. Xuquuqda hadalka.
2. Xuquuqda abaabul bulshadeed iyo mid siyaasadeed.
3. Xuquuqda in sharciga la hor keeno haddii dambi lagu soo oogo mudo cayiman dhexdooda sida uu sharciga dalka qabo.
4. In aan laga hor istaagi-karin adeegyada bulshada si la siman shacabka intiisa kale.

Tiirka labaad: Amniga

Suggidda amni waa asalka nolosha bani-aadamka oo ay jiritaankiisa ku xiran tahay.

Nabad baa naas la nuugo leh

Nolol iyo horumar lama heli karo, sidoo kale maalgashi iyo ganacsi wadama dibadda ah ay ku sameeyaan dalka lagama hadli karo haddaaneey amni jirin oo si joogta ah loo baneysanayo nafta iyo hantida umadda Soomaaliyeed. Waxaan shaki ku jirin in amnigu yahay waxa ugu horreeyo oo ay bulsho ama xukuumadeeda ay sugto si ay ugu gudubto haqabtirka baahida nolosha inteeda kale. Aminiga oon sugnayn, lama heli

karo waxbarasho tayo leh, caafimaad casri ah, shaqo iyo ganacsi kobca iyo bulsho leh awood iibsasho (purchasing power).

Amnigu waa furaha nolosha, sugiddiisuna waxaa iska kaashanaaya xukuumad, bulsho iyo muwaadinka. Wada shaqeeyn dhab ah oo saddexdaasi ka dhexeeya wuxuu keenaa isku xirnaan shacab iyo xukuumad oo meel uga soo wada jeesta sugidda amaanka dalka.

Istiraatiijiyadda sugidda amniga ee saddex geesoodka ah:



Amniga Xukuumadda: Doorka ciidamada qalabka sida, boliiska iyo hay'adda nabadsugidda iyo sirdoonka qaranka waa in ay difaacaan madaxbanaanida dalka iyo ilaalinta nabadda iyo xasiloonida dhamaan bulshsada Soomaaliyeed. Xukuumaddu waa in ay mudnaan iyo tixgelin siisaa xuquuqda shakhsiga iyadoo ay ku guda jirto waajibaadkeeda shaqo oo aan lagu xadgudbin xuquuqda muwaadinka oo isaga ay u adeegeeyso. Hay'adaha amniga waa in ay kasbadaan, xiriir joogto ah oo wanaagsan la yeeshan ururada bulshada, hoggaanka bulshada iyo dadka horseedka u ah danaha deegaanka amaankiisa la sugaayo. Hay'aduhu waa in ay taakuleeyaan guddiyada amniga deegaanka, ka talo geliyaan sugitaanka amnigooda, kasbadaanna wada shaqeeyntooda iyo kalsoondooda. Amniga ciidan keliya ma sugi karo keligiis, haddii aanay muwaadinka iyo bulshadu raali ka wada ahayn hawsha nabad sugidda, kuna faraxsaneeyn hawsha sugidda amnigooda qaabka loo maray, inta aan ka ahayn eedeysanaha barista ku socoto.

Xisbigu wuxuu u istagayaa daryeelka, kobcinta iyo tayeeynta ciidamada nabadda ilaaliya oo dhan. Waxan dhaqaale ku bixin doonaa sidii dib loogu hagaajin lahaa ciidanka xooga dalka oo loo soo celin lahaa dowrka sharafka leh oo uu kaga jiray qarannimada Soomaaliyeed iyo caalamkaba. Sidoo kale waxaa hormarin doonnaa tababarada ciidamda qalabka sida iyo kuwa amaanka oo dhan siday u noqon lahaayeen kuwa hawshooda si sharaf iyo khibrad leh u guta shacabka iyo dowladdana u soo hooya magac iyo mudnaan. Waxaa muhiim ah in tababaro dheeraad ah oo ku saabsan macaamilka bulshada (community relations) iyo daryeelkooda la siiyaa ciidamada sida tooska ah ula shaqeeya shacabka sida boliiska iyo hay'adaha nabadsugidda, tababarkaas oo la xiriira ixtiraamka xuquuqda muwaadinka iyo wada-shaqeynta kala dhaxeysa shacabka iyo isu soo dhowaanshaha ciidamada amniga iyo shacabka ay amaankooda sugayaan.

Xukuumad ay hogaamiso Xisbiga Midqaran waxa ay muhiimadda koowaad siin doontaa sidii xaaladda amni ee dalka horumar tayo leh oo la taaban karo muddo kooban looga qaban lahaa. Waxan xooga saari doonaa Horrumarinta Kuliyaddaha Waxbarasho dhinaca Ciidanka si loo helo askari aaminsan in shacabku yahay cidda uu shaqeynayo lana falgali kara shacabka si loo yareeyo kalsooni darada ay bulshadu ka qabto ciidamada qalabka sida. Waxaan ballanqaadeeynaa in uu dalku yeesho hal ciidan qaran oo leh astaanta ciidanka xoogga dalka Soomaaliyeed oo yeesha furuuc, taas oo astaan u ah midnimada iyo jiritaanka qaranka Soomaaliyeed.

Amniga Bulshada: Doorka bulashadu ay ka geeysato sugitaanka amniga waa mid muhiim ah. Bulshadu waa indhaha iyo dhega sharciga oo loo baahan yahay in ay ogaadaan waxa ka socda aaggooda oo ka horimaanaaya dhaqamada suuban iyo shuruucda dalka, lana wadaagaan hay'adaha dowliga ah oo ku shaqo leh arrimahaas. Bulshadu waa in ay yeelataa waxa afka qalaad loogu yaaqaano "neighborhood

watch” ama Ilaaalinta xaafadda oo micnaheedu yahay in ay ka warqaabaan qofka cusub ee ku soo biiray xaafadda, ogaadaana wixii dhib gaar ah ama mid caam ah geeysan gara oo ay la wadaagaan hay’adaha amniga oo deg deg wax uga qabta arrimahaas. Xaafada waliba markay sugto amnigeeda iyada, howsha u harsan hay’adaha amniga ee dowliga ah waa ay yaraanayaan oo si fudud bay hawlaha qaranka u fulin karaan. Bulshadu waa inaysan u fahmin sugitaanka amnigu in uu yahay mid u yaalo oo keliya hay’adaha dowliga ah, ee bulshadu uu xil weyn oo muhiim ah ka saran yahay sugitaanka amniga. Wada shaqeynta bulshada iyo hay’adaha amniga waxay sal u tahay nadabeeynta dalka oo bulshado waa in ay dowr weyn oo mid shakhsi ah iyo mid wadareed kawada qaadataa hawlaha sugidda amniga.

Amniga Shakhsiga: Sugitaanka amiga wuxuu ka bilowdaa shakhsiga muwaadinka oo laga amaan helo oo isna amaan geliyo dadka uu la mucaamalaayo. Sugidda amniga shakhsiga wuxuu ka imaanayaa in uu tixgeliyo dadka ay mucaamalada kala dhaxeeyso, isna la tixgeliyo. In muwaadinku isticmaalo erayada ixtiraamka iyo qadarinta ku dheehan, sida walaal, fadlan, adigoo raali ah, waan ka xumahay, ii dulqaado, iwm lagana fogaado erayada aan ixtiraamka ku jirin oo loo isticmaalo dadka oo dhan gaar ahaan caruurta, haweenka iyo dadka waayeelada ah ee qadarinta mudan sida: waryaa, naayaa, iga hor leexo, na-dhaaf iwm. Waa in dalku yeeshaa shuruuc ka hortagaya gacan ka hadalka shakhsiga, xeerna loo sameeyaa oo qofka gacan ka hadalka bilaabay in uu dambiile yahay sabab kastaba ha keentee. Inta aanu qofka gacan ka hadal ku dhaqaaqin waa in uu dacwad ka keenaa qofka uu dhibka ka sheeganayo oo uusan sharciga gacantiisa ku dhaqan gelin. Shacabka Soomaaliyeed waa in ay dib u eegaan dhaqanada u horseeda colaadaha oo ay ka mid yihiin luqadaha adag e dadka loo adeegsanaayo oo waa in la raacaa sunada nabigeena Muxamad SCW ee ah dhaqan wanagga iyo akhlaaqda suuban (Makaarim al-akhlaaq).

Dhaqanka suuban ee bulsho u horseeda nabadda iyo wadanoolaashaha wuxuu ka bilowdaa habka ay isu qadariso bulsho ooy isu taakuleeyso. Amniga bulshadu wuxuu ka bilowdaa shakhsiga muwaadinka oo garta qeybta uga aaddan sugidda amnigiisa iyo tan dadka uu waxyeeleeynaayo oo uu ogaadaa amniga guud in uu ka yimaado muwaadiniin badan oo isnabad geliya oo xakameeya shucuurtooda una hoggaansama dhaqanka suuban iyo shuruucda dalka.

Si looga shaqeysiiyo istiraatiijiyadda saddex geesoodka ah ee sugidda amniga, dowlad uu hogaamiyo MIDQARAN waxa ay balanqaadeysaa hirgalinta qodoban soo socda:

1. U dhameystirka hay'adaha ka shaqeeya howlaha amniga dhamaan tababarada, qalabka iyo xuquuqda ay u baahanyihiin si ay howshooda u gutaan, sida tayeynta qalabka boliiska iyo nabadsugidda taasi oo awood u siineysa in ay ka hortagaan falalka amnidaro sidoo kale ay usoo qabtaan danbiilayasha ku dhaqaaqa falal amni daro.
2. Hirgalinta barnaamijka dariseynta magaalooyinka dalka sidoo kale banaamijka isku xirka laamaha boliiska iyo waxgaradka xaafadda si looga shaqeysiiyo doorka ay bulshadu ku leedahay sugidda amniga
3. Dibuhabeynta nidaamka waxbarashada madaniga ah ee dalka iyo dajinta manaahij ku dhisan tarbiyeynta ubaxa dalka. Manaahijtaas oo ka turjumeysa wadaniyad, ixtiraam iyo jaceyl si loo nooleeyo doorka uu shaqsigu ka ciyaari karo sugidda amniga

Xallinta khilaafaaka iyo la dagaalanka xagjirka

Dagaalka ay argagixsada waxa uu galaaftay nolosha muwaadiniin badan, sidoo kale waxa uu dalka ka hortaaganyahay horumar iyo fursado badan ee wax looga qaban lahaa xaaladaha bani'aadanimo ee cakiran ee dalka ka jira. Ma jirto dowlad hore oo Soomaaliyeed oo si bareer iyo si dadban ba isugu taxalujisay in ay wadahadal toos

ah la gasho qolyaha falalka guracan shacabka ku hayo si loo ogaado dhab ahaan ujeedka jabhadaha hubeeysan ee naba diidka iyo in si nabad ah xal looga gaaro. Wadama badan oo sideena oo kale ayey heysatay xaaladeena oo kale oo dagaal keliya xal lagu gaari waayey, marka u dambeeysana wada xaajood iyo isfaham lagu yareeyey colaadihii amaba lagu soo afjaray.

Xukuumadda ay hoggaamiso Midqaran waxay yeelan doonta siyaasad laba afle ah:

1. In **wada hadal fool ka fool ah lala yeesho hoggaanka Soomaaliyeed ee jabhadaha nabad-diika ah** si xal looga gaaro xaaladaha cakiran, loo yareeyo colaadaha joogtada ah ummadda Soomaaliyeedna ay xasilooni helaan.
2. Haddii la waayo in **dagaal bareere ah oo noqonaayo muhiimadda 1aad ee qaranka** Soomaliyeed oo lagu qaado kooxda nabad -diidka ah, laguana sameeyo baaritaan qoto-dheer kaasi oo la xiriira kooxaha nabad-diidka ah iyo cidda ay ku xiranyihiin gudaha iyo dibadda, iyadoo loo adeegsanaayo barnaamijkan:
    a. **Hanuunin bulsho** iyo fahamsiin dhab ah waxa ay nabadiidku rabaan iyo waxa dowlad iyaga maslaxadooda u taagan ay rabto. Arrintaan waxaa ka qeybgelaaya culimada, nabadoonada, waxgaradka oo rag iyo haween ba leh iyo dhalinyarada.
    b. Xukuumaddu waxay **dhaqan celin** siineeysaa dadyowga la marin habaabiyey oo ay soo jiidaneeysaa beelaha iyo nabadoonada gacan saarka dadban la leh xagjirka oo aan u adeegin maslaxadda umaddooda.
    c. Wasaaradda warfaafiinta, dhalinyarada iyo cayaaraha, cadaaladda, waxbarashada, caafimaadka, arrimaha gudaha, shaqada iyo shaqaalaha, iyo difaaca waxay ka wada qeyb qaadanaayaan **barnaamijka qaranka ee taakuleeynta, tababarka iyo shaqo u abuuridda** dadka ka soo

baxsada kooxda nabad-diidka ah kadib markii si qoto-dheer loo xaqiijiyo fekerkiisa.

d. U tababaridda xirfadaha gacanta dadka kasoo baxsada ama ku jiray gacanta kooxda nabad-diidka ah si ay ugu maareeyaan nolosha qosaskooda ugana qeyb qaataan wax soo saarka dalka.
e. Xukumadihii isaga danbeyey dalka soo maray waxa ay ku guul dareysteen meel marinta xeerka la dagaalanka nabad diidka ah. Xukumad ay hogaamiso MIDQARAN, waxa golaha shacabka hor keeneysaa xeerkaas. Si ay danbi u noqoto in garab la siiyo qof ama shaqsiyaad ku eedeysan fal-danbiyeed nabad diid ah.
f. Dadka ka soo baxsada kooxda nabad-diidka ah waa in ay si caam u raddiyaan ugana soo horjeestaan mabaadida kooxda nabad-diidka ah. Kuwooda aan rabin in ay si muuqato u riddiyaan kooxda xagjirka waa in sharciga dalka lagu qaadaa si aaneey u baadiyeyn inta wanaagga rabto.
g. In beelaha, nabadoonada, ganacsatada iyo shacabka guud ahaan laga jaahil bixiyo siyaabaha uu xagjirka ku shaqeysto iyo in aakhirkii xagjirku uusan saaxiib joogta ah lahayn.
h. Shacabka Soomaaliyeed waa in ay kala yaqaanaan cadowgooda iyo saaxiibkood. Cadowgu waa in uusan marnaba yeelan walaal iyo beel oo uu garab ka helo marka gacanta lagu dhigo oo aan la helin cid daba ordeeysa oo qiil u raadineeysa. Cadowga qaranka iyo shacabka waa in meel looga soo wada jeestaa.



Tiirka Saddexaad: Cadaaladda

Muwaadiniinta Soomaaliyeed waxaa wada deeqa cadaalad loo wada siman yahay. Cadaaladdu waa midda horseedka u ah dhisme bulsho oo caafimaad qaba oo nidaam, kala dambeeyn iyo nabad ku wada noolaada. Cadaaladdu waa tiirka saddexaad ee saddexda tiir ee siman oo ay dowladdeenu ku dhisan tahay:

Mudadii dowlad la'aanta jirtay waxay dhashay colaado, xadgudubyo, dacwooyin iyo dembiyo aan la xaq soorin ama helin cadaalad dhab ah oo ay shacabku ku daawoobaan. Waxaa kaloo batay xuquuq la'aanta hawlwadeenada cadaalaldda oo dantu ku kalliftay in ay si khaldan shaqadooda u adeegsadaan iyo kuwo ka faaideeystay dhaqan xumida musuqmaasuqa baahsan ee bulshada oo keentay in xitaa ay saameeyso hawlwadeenda cadaaladda oo iyaga looga fadhiyey in ay shacabka u kala xaq sooraan.

Xukuumadihii dalka isaga danbeeyey kuma guuleysan in ay dhisaan oo aasaaska u taagaan hay'adaha cadaaladda oo la helo tababaro joogto ah oo wacyiga shaqaalaha hayadaha cadaaladda kor loogu qaado, lana fahamsiiyo adkeynta sarreynta sharciga.

Hayad'aha cadaaladda uma jiraan si ka madax banaan xukuumadda, umana shaqeeyaan si sharciga waafaqsan, mararka qaarna waxaa loo adeegsadaa dano gaar ah.

In muddo ah hoggaanka siyaasadda Soomaaliyeed waa ay iska indho-tireen in ay magacaabaan guddi maxkamadda dastuuriga si ay hawlaheeda dastuuriga ku gudato sida ku qeexan dastuurka qaranka.

Xisbigu wuxuu ku baaqayaa in deg-deg loo sameeyo golaha adeegga garsoorka sida uu qabo dastuurka qaranka, golahaas oo ka kooban sagaal (9) xubnood. Waxaa kaloo muhiim ah in si deg deg ah loo abaabulo Maxkamdda Dastuuriga oo ka kooban shan (5) xubnood, si ay u noqoto hay'adda ugu sareeysa ee qaranka oo la horkeeno dacwooyinka doorashooyinka si ka madax bannaan golayaasha fulinta iyo sharci-dejinta.

Xisbiga MIDQARAN waxa uu xoojin doonaa nidaamka garsoorka ee dalka iyo hubinta madax banaanida garsoorka si cadaaladu u noqoto mid loo simanyahay. Maadaama uu dalku mudo badan burbursanaa xiligii ka horeeyeyne ay jirtay nidaam kaligii-talis ah, waxan aaminsanahay in aqoonta garsoorayaasha sare loo qaado si ay awood ugu helaan in ay shaqadooda u gutaan si hufan oo aysan eex ku jirin.
Xisbiga MIDQARAN waxa ka go'an hirgalinta cadaalad madax banana oo awood u leh in ay qaado dhamaan talaabooyinka sharci ee lagu ilaalinayo xuquuqda muwaadinka Soomaaliga ah. Mabadi'da xisbiga waxa ka mid ah in muwaadin kastaahi uu xaq uleeyahay in la dhageysto uu is difaaco markii lasoo eedeeyo.

Dhamaan muwaadiniinta Soomaaliyeed in ay noqdaan kuwa u siman cadaalada oo aysan ku xirneyn inuu qofku mas'uul xil hayo yahay iyo inuu qof shacab ah yahay.

Si loo xaqiijiyo mabda'aas aasaasiga ah, Dowlad ay hogaamiso MIDQARAN, waxa ay balanqaadeysaa dhameystirka hay'adaha garsoorka dalka. Waxan ka fiirin doonaa

garsoore kasta oo ka mid noqonaaya garsoorayaasha dalka inuu leeyahay aqoonta iyo hufnaanta looga baahanyahay in booskaasi yeesho si loogu adeego shacabka Soomaaliyeed. Si taasi lagu xaqiijiyo, waxaan hirgalin doonaa in garsoore kasta ee uu soo magacaabo madaxweynaha jamhuuriyadda federalka Soomaaliya uu si shaqsi ah horyimaado golaha sharci dajinta dalka ee uu dastuurku qabo iyaga oo su'aalo weydiinaya inta ay cod-u-qaadin ka hor si ay xaqiijinyaan aqoonta, khibradda, hufnaanta, shaqsiyadda iyo amaanada garsooraha.

Tiirka 4aad: Adeegga Bulshada

Bulshada Soomaaliyeed waxay in muddo ah aysan haysan adeeg bulshadeed oo ay u qabtaan xukuumad qaran, maamul gonbol iyo mid degmo. Adeegyada aasaasiga ah ee bulshadu u baahan tahay waxaa ka mid ah: Amniga deegaanka oo la sugo, ciidan iyo saldhig boolis ah, dugsiyo waxbarasho oo hoose iyo sare-ba, xarumo caafimaad, iyo xaruumaha horumarinta wadaniga iyo dhismaha bulsho caafmaad qabta.



"Adeegga Bulshadu waa xariga isku xira muwaadhinka iyo dowladda Soomaliyeed"

Hoggaanka Xisbiga Midqaran

Xukuumaddu waa in ay adeegga bulshada muhiimad gaar ah siisaa, si loo helo bulsho ku xiran dowladda, dowladnimadu gaarto, iyo barnaamijyo lagu kobcinaayo wadaninimada iyo walaaltinimada umadda Soomaaliyeed. Adeegga bulshada ee waxbarasho, caafimaad, amni iyo arrimo badan oo ay dawladuhu u qabtaan sida dhaqsi u helidda dukumentiyada sharciga kala iibsadaha guryaha, dhulalka, gawaarida iyo dukentiyada kale ee muwaadinnimada caddeyneesya sida warqad dhalasho, shatiyada rukhsada darawalnimada, baasibooorada iyo wixii la mid ah.

Haddii ay bulshado hesho hawl qabad deg deg ah oo culays musuqmaasuq iyo baryo waxyaabo ay xaq u leeyihiin aan lagu sameeyn, waxaa imaanaaya in qoflu qanco oo galo dareen farxad geliya oo soo celiya kalsoonidii uu ku qabay dowladdiisa. Hase ahaatee, haddii qofka muwaadhinka lagu ciriiriyo hawlo uu xaq u leeyahay ama laaluush laga qaado oo uu ku dhibtoodo wax uu xaq u leeyahay, waxaa hoos u dhacaaya kalsooniduu u qabo dowladiisa, shakina gelineysa sababta uu dalkaan ugu nool yahay, marka dambana lumiya dareenka wadaninimo iyo badbaadinta qaranka Soomaaliyeed.

Xukumad ay hogaamiso MIDQARAN waxa ay ka hortageysaa dhaqan kasto oo lagu weydiinayo muwaadinka Soomaaliyeed inuu bixiyo lacag si loogu fududeeyo howlihii uu xaqa u lahaa in ay dowladdu u qabato shacabka. Waxan xaqiijin doonaa in howlwadeenada dowladu ay xuquuqdooda helaan sidoo kale ay si hufan u gutaan howlahooda. Ficilka kasto oo muwaadinka looga qaadayo lacag dheeri ah si howsha loogu fududeeyo waxa uu keenayaa inuu dhaawaco kalsoonida ay shacabku ku qabaan dowladooda. Sidaasi darteed waxan u aqoonsan doonaa musuqmaasuq.



Shacabka Soomaaliyeed iyo xukuumadooda oo wada shaqeeya ayaa yareyn kara musuqmaasuqa iyo in lagu hannuniyo dadweeynaha in aysan sinaba u aqbalin musuqmaasuq in ay wax ku bixiyaan hawl fudueeyn darteed. Falka noocaas ahina aysan amaaneyn xag diin, dhaqan iyo nidaamka casriga ah ee adduunku ku shaqeeyo. Waa in barnaamij hanuunin oo joogta ah ay wada sameeyaan wasaaradaha

maaliyadda, awqaafta iyo diinta iyo warfaafiinta oo baraha bulshada ay ku kala warqaadato laga sii daayaa si joogto ah.

Waxbarashada

Waxbarashadu waa xuquuq aasaasi ah uu muwaadinku leeyahay. Waxa ay qeyb weyn ka qaadataa horumarka dhaqan-dhaqaale ee dalka. Sidoo kale waxaa hubaal ah sida ku cad sawirka hoose in waxbarashadu ay kaalin mug leh ka ciyaareyso koboca dhaqaalaha dalka, wax ka qabashada xaaladda amnidaro iyo la dagaalanka kooxaha argagaxisada ah. Si looga hortago lagna joojiyo caruurta ay u adeegsanayaan falalka guracan, waxaan xooga saari doonnaa in carruurta da'ada yar iyo dhalinyaradu dhalinyaradu hesho waxbarasho aasaasi ah oo lacag la'aan ah, tayo leh, loona abuuro mustaqbal.

Dowlad uu hogaamiyo xisbiga MIDQARAN amba uu ka mid yahay waxa ay noqoneysaa mid siisa muwaadiniita waxbarasho tayo leh sidoo kale shuruuc ka dajisa waxbarashada dalka si ardayga kasoo baxaahi uu awoodi karo in uu la jaanqaado baahiyaha suuqa ka jira heystana xirfadii iyo aqoontii looga baahnaa inuu noqdo hal-abuure ganacsi midaasi oo wax weyn ka badaleysa dhaqaalaha dalka. Sida ku cad warbixinta bank-ga aduunka in ka badan kala bar caruurta Soomaaliyeed ma helaan waxbarsho isla markaana boqolkii in ka yar 30% ayaa wax qora ama akhriya.

Xisbiga Midqaran wuxuu aaminsan yahay in malcamadda ama dugsiga quraanku ka mid noqdo barnaamijka waxbarashada ubadka Soomaaliyeed oo uu ka bilaabo socdaalkiisa waxbarasho dugsiga quraanka. Xukuumaadda Soomaaliyeed iyo shacabkaba waa in ay taakuleeyaan dugsiyada quraanka lana ilaaliyaa madaxbanaanidooda si qalabka waxbarashada, hagaajinta goobta waxbarashada, nidaamka barashada ardayga iyo manhajka barista macallinka ay u noqdaan kuwa kobciya koritanka iyo rabitaanka waxbarashada ardayga.



Xisbiga Midqaran wuxuu awoodda saaraayaa sidii loo tayeeyn laha waxbarashada dalka oo ka bilaabaneeyso da'da carruurta jirta 3 sano. Xisbiga wuxuu soo jeedinaayaa in ay waxbarshadu qasab ku noqoto caruurta da'doodu u dhaxeeyso 3sano ilaa iy fasalka 8aad ee dugsiga dhexe oo ay xukuumaddu bixiso waxbarasho tayo leh oo lacag la'aan ah. Xisbigu wuxuu aaminsan yahay af-soomaaligu in uu sal u yahay waxbarshada dalka iskuna taxalujinaayaa sidii loo kobcin lahaa af-Soomaaliga, loogana dhigi lahaa luqad isticmaalkeeda ku baahda geeska Afrika iyo meel walboo Soomali deggan tahay. Waxaan shaki ku jirin umadi inaysan horumar ku gaari karin waxaan ahayn afkooda hooyo. Waa tii horay loogu luqadeeyey in aysan aqoontu ahayn af-qalaad: "Af-qalaad aqoonta miyaa, maya maya".

Xibiga Midqaran wuxuu aaminsan yahay sare u qaadidda waxbarashada dalka ha noqoto manhajka dugiyada iyo jaamicadaha iyo in xoog la saaro maadooyinka Sayniska, Xisaabta iyo technoologiyada oo abuuri karo shaqaale xirfad casri ah leh

oo haqab tiri kara baahida bulshada. Xisbigu wuxuu aaminsanyahay in dugsiyada iyo jaamicadaha qaranka la kobciyo iyada oo ay jaamacaduhu xooga saarayaan cilmi barista si sare loogu qaado tayada ardayda kasoo baxeysa jaamacadaha kana dhigeysa kuwa awood u leh in ay suuqa ku dabaqaan cilmigii ay soo barteen. Xisbigu wuxuu aaminsan yahay in xukuumaddu sameeyso hanaan (criteria) lagu kala garto jaamicad, kulliyad, kulliyad farsamo (technical college), waxbarashada dadka waaweyn, aqoon kororsi heer jaamicadeed iyo wax la mid ah.

Xisbigu wuxuu aaminsan yahay in waxbarasho dibadeedka (minxooyinka) si cadaalad ah loogu qeybiyo ardayda Soomaaliyeed ee dugsiyada ka baxa, iyadoo la fiirinaayo natiijooyinka imtixaanka si guud loo qaaday. Fursadaasi waxa ay dhacday sanadkii 2011, xiligaas uu godoomiyaha xisbiga MIDQARAN ahaa wasiirka hidaha iyo tacliinta sare ee dowladda federalka. Imtixaanka ardayda loogu qeybinayey minxooyinka dibadda laga helo waxa uu kadhacay xiligaas caasimadda dalka ee Muqdisho sidoo kale xeryaha qaxootiga Kenya iyo Adis Ababa oo ay Soomaali badani ku sugneyd xaaladda amni ee dalka oo xumeyd awgeed. Ardayda ka soo qalin jebiyey Garowe iyo Hargeysa si cadaalad ku jirto ayey saamigooda waxbarasho u heeleen ayadoo la fiirinaayo natiijada imtixaanadooda.

Sidoo kale xukumad ay hogaamiso MIDQARAN waxa ay dhiirigalineysaa kana qeyb-qaadaneysaa in ardayda ay helaan fursad ay ku baran karaan afaka qalaad gaar ahaan afka Carabiga iyo Ingiriiska, si ay ula jaanqaadaan hanaanka waxbarashada casriga ah ee aduunka iyo isbedelka tiknoolojiyadda caalamka, sidoo kale ay ardaydeedu si buuxda uga faa'ideystaan fursadaha waxbarasho lacag la'aanta ah oo ay bixiyaan hay'adaha iyo wadamada horumaray iyaga oo siiya ardada wadamada soo koroya oo ay Soomaaliya ka mid tahay.

Xisbigu waxa uu balan-qaadayaa dib-u-habeyn balaaran oo lagu sameeyo wasaaradda waxbarashada hidaha iyo tacliinta sare. Sida aan wada ogsoonahay dalka waxa ka sameysmay jaamicado farabadan oo aan lagu sameyn qiimeyn rasmi

ah in ay soo buuxiyeen shuruudihii looga baahnaa in ay jaamacadi yeelato. Shaqadaas waxa ka gaabiyey xukuumadihii hore oo looga baahnaa in ay soo dhisto **Guddiga Tacliinta Sare** ee dalka oo ah guddigii gudan lahaa shaqadaas, jaamacaddi soo buuxisa shuruudaha iyo tayada looga baahanyahay jaamacad gudoonsiin lahaa aqoonsi “accreditation" si loo helo jaamacado tayo leh oo soo saara aday hal abuur leh una diyaarasan in ay wax ka qabtaan baahiyaha dalka ka jira. Sidoo kale waxaan hirgalin doonnaa dib u habeynna lagu sameyn doonaa kuliyadda macalimiinta si loo xaqiijiyo tayada macaliiminta iyo aqoonta ay u gudbinayaan ardada.

Caafimaadka

Macluumaadkii u danbeyey uu bank-ga aduunku ka diyaariyo xaaladda caafimaad ee shacabka Soomaaliyeed sanadkii 2018 waxa uu ku sheegay in 5.5 million oo qofood aysan heli karin kalkaalin caafimaad lana daala-dhacayaan cuduro kala duwan oo la daweyn kari lahaa hadii dhaqaatiir, kalkaaliye caafimaad, shaybaar ama cusbitaal la heli lahaa. Sidoo kale 6.2 million oo qofood oo Somali ah ay wajahayaan cunto la’aan iyo in sedexdii qof oo Somali ah mid ka mid ahi wajahayo xaalad faqri oo daran. Faqriga heerkaas gaarsiisan waxa uu keenayaa in ay kordhaan cuduradu dad badanina ay u nuglaadaan inuu cudur ku dhaco.

Dowlad uu hogaamiyo ama uu ka mid yahay xisbiga MIDQARAN waxa ay dajin doontaa siyaasad wax looga qabanayo xaaladda caafimaad ee dalka, waxa ay muhiimad aad u sareysa siineysaa wasaaradda caafimaadka si adeeg caafimaad u heli lahaayeen muwaadiniinta loona xaqiijiyo tayada dawada dalka soo gasha.

Waxan aaminsanahay in caafimaadka bulshada iyo wax soo saarka dalka ay ka dhaxeyso xiriir xoogan. Muwaadinku marku uu caafimaad qabo ayuu wax-baran karaa shaqeysanne karaa, sidaas darteed ayey caafimaadka bulshadu ay ahmiyad gaar ah inoogu leedahay si loo kobciyo wax soo saarka dalka. Si loo yareeyo

dhimashada hooyada iyo dhalaanka waxan dalka ka hirgalin doonaa xarumo yar-yar oo caaafimaad, kuwaasi oo u adeega bulshada ku nool meelaha ka baxsan magaalooyinka waaweyn ee leh isbitaalada, sidoo kale xisbigu waxa uu xooga saarayaa siyaasad dhiirigalineysa in sare loo qaado fursadaha waxbarasho iyo shaqo ee gabdhaha si ay daqli u abuuraan ay ugu kabtaan caafimaadkooda iyo noloshooda. Waxan dajin doonaa siyaasad mideysa hay'adaha caalamiga ah ee aan dowliga aheyn ee ka shaqeeya dalka iyo wasaaradda caafimaadka si loo xaqiijiyo in aan si hufan uga faa'ideysano kaalmada caafimaad ee inooga imaata dibadda.

Xisbiga MIDQARAN waxa uu aaminsanyahay caafimaadku in uusan aheyn shey ay dad gaari ahi mudnaan u leeyihiin ee uu yahay xuquuq uu leeyahay muwaadin kasta oo Soomaali ah. Dowlad uu hogaamiyo MIDQARAN ama uu qeyb ka yahay waxa ay ka hortagi doontaa in shacabkeenu ay dhintaan sabata oo ah in aysan dhaqtar booqan karin si loo ilaaliyo hantida ugu muhiimsan dalka oo ah dadka Soomaaliyeed.

Haweenka

Xisbiga MIDQARAN waxa ka go'an sare u qaadida fursadaha hoggaan, maamul, shaqo iyo waxbarasho ee haweenka iyo gabdhaha. Tirada ugu badan shacabka Soomaaliyeed oo uu faqrigu, nafaqa darradu ay aad ugu badan tahay isla markaana aan heli Karin daryeel iyo adeeg caafimaad waa haweenka. Sidoo kale dakhliga soo gala haweenka waa mid ku baxa nafaqeynta iyo waxbaridda caruurta oo ah hantida mustaqbalka dalka uu leeyahay.

Dowlad uu hogaamiyo ama uu ka mid yahay xisbiga MIDQARAN waxa ay sare u qaadi doontaa fursadaha aqoon kororsiga iyo shaqo abuuridda haweenka iyada oo la hirgelinaayo mashruucyo lagula dagaalamo faqriga. Mashruucyada waxaa ka mid noqon doona tababar loo sameeynayo haweenka ee quseeya ganacsiyada yar yar oo ay helaan in ay xirfadahooda guri u isticmaalaan ganacsi oo la siiyo dhaqaale shaqo

abuuris ah oo ay dib u soo celiyaan markay soo kabsadaan (Microfinance). Sidoo kale waxan hirgaelin doonaa in gabdhahu ay si siman uga qeyb qaataan fursadaha shaqo iyo waxbarasho ee dalka.

Waxan taageeri doonaa in ay dumarku si buuxda uga qeyb qaataan siyaasadda dalka anaga oo aaminsan in dumarka Soomaaliyeed ay wax weyn ka badali karaan xasilinta iyo horumarinta. Xisbiga Midqaran wuxuu ayidsan yahay quotada haweenka ay ku leeyihiin awood qeybsiga dalka kaasoo ah 30%. Hase ahaatee si qoondadadaan loo waafajiyo fekerka ah in maamulka dowlddu ku dhisnaado nidaam aqoon iyo karti ku saleeysan, waa in haweenka buuxinaaya qoondadaan ay aqoon iyo khibrad u leeyihiin xubnaha ay buuxinaayaan.

Qaadka

Cunista qaadka waa mid ka mid ah dhibaatooyinka dhaqan-dhaqaale iyo bulsho ee heysta shacabka Soomaaliyeed. Maalintii waxaa dalka ka baxda lacag lagu qiyaaso $400,000 taasi oo ka dhigan $146 milyan sanadkii, kuna soo badalano qaad.

Qaadka waxaa dunida horumartay u aqoonsatay in yahay drug oo uu la mid yahay daroogooyinka ka mamnuucan in dalalkooda la soo geliyo, ciddii lagu qabtana sharciga lala tiigsanaayo.

Xisbiga MIDQARAN waxa uu u arkaaa qaadku inuu yahay aafo qaran oo aan ku ekeyn qasaaro lacageed oo keliya oo uu saameeyo nolosha qofka, ehelkiisa, shaqadiisa, waxbarashadiisa, maqaamkiisa bulshada iyo mustaqbalka reerkiisa.

Dowlad uu hogaamiyo ama uu ka mid yahay MIDQARAN waxa ay dajin doontaa istiraatiijid looga gudbayo dhibaatada qaadka taasi oo mareysa marxalado kala duwan sidoo kalane qaadaneysa waqti si loola tacaalo dhibaatada uu qaadku ku hayo bulshada Soomaaliyeed. Waxaan dalka ka hirgelin doonnaa olole qaran oo bulshada looga wacyi galinayo cunista iyo ka ganacsiga qaadka, waxa xigi doona taalaabooyin kale oo lagu dajin doono siyaasad lagusii dhimayo qaadka wadanka soo gala sida in

dadka iibiya qaadka ee haweenka u badan lagala shaqeyn lahaa sidii ay ganacsi kale oo ay noloshooda ku maareeyaan ugu biiri lahaayeen iyada oo loo sameyn doono canshuur dhaaf mudada hore ee uu ganacsigu bilow yahay; sidoo kale in canshuurta lagu kordhiyo qaadka soo gala dalka iyo marxaladda ugu danbeeyso oo ah joojinta keenidda qaadka dalka iyada oo la eegayo awooda ay u leeyihiin laamaha amniga iyo cadaaladda dalka dhaqan galinta sharcigaas. Waxan xaqiijin doonnaa in lahelo bulsho u heelan wax soo saarka dalka kana caafimaad qabta dhibaatada qaadka iyo waxyaabaha maanka dooriya.

Tiirka 5aad: Kobcinta Dhaqaalaha

Xaaladda dhaqaale ee dalka waxa saameyn baaxad leh ku yeeshay marxaladihii kala duwanaa uu dalku soo maray. Waxaa burburay qeybihii waxsoo saarka dalka, waddanku waxa uu ku tiirsanyahay raashiin iyo alaab dibedda laga soo dhoofiyey midaas oo keentay in lacagta dalka xoogeeda ay dibadda u baxdo marka loo eego lacagta soo gasha maadama ay aad u yartahay wax soo saarka dalka iyo waxa aan inagu dibadda u dhoofino. Sidoo kale muwaadininta dalka waxa ay noqdeen kuwa u nugul isbedelka qiimaha maciishadda ee ka dhaca dalalka aan wax kasoo iibsanno midaasina ay saameyn culus ku yeelatay muwaadiniin badan oo markii horaba noloshu ku adkeyd. Si marxaladaas looga gudbo, shaqo abuurna loogu sameeyo muwaadiniinta waxa xisbiga MIDQARAN hirgalin doonaa siyaasad ku dhisan in aan maciishadda dalka gudahiisa ka soo saarano, sidoo kale waxan ka shaqeyn doonnaa in aan ganacsatada wax dhoofisa u abuurno suuqyo dibadda ah ay u suuq geyaan badeecadooda iyada oo laga qaadaayo canshuur macquul ah oo dhiirigalisa marka ay khayraadka dalka ay dibedda u iib geynayaan. Si midaas looga mira dhaliyo waxaan xooga saari doonaa sidii looga shaqeysiin lahaa wasaaradaha beeraha, kaluumeysiga iyo xanaanada xoolaha si dhaqaalaha dalku u kobco, ganacsatada Soomaaliyeedn uu dakhli ka soo galo wax soo saarkooda. Waxan si

xoogan canshuurta uga khafiifin doonaa qalabka wax soo saarka ee dibadda laga keeno sida cagafyada, buldoozarada, matoorada waraabka, qalbka soo saara calafka xoolaha, Gaadiidka qaada xoolaha, qalabka warshadaha ee soo saara: caanaha, hilibka, hargaha, khudaarta gasacadeeysan, kaluunka gasacadeeysan, iyo agabyada kale ee ka qeyb qaadanaaya wax soo saarka iyo shaqo abuurka dalka.

Dowlad uu hogaamiyo MIDQARAN ama uu ka mid yahay waxa ay dajin doontaa siyaasad dhaqaale oo saldhig u ah mabda'a suuqa xorta ah, xoojinta hay'adaha wax soo saarka dalka iyo dhiirigalinta ganacsiga gaarka loo leeyahay. Sidoo kale dib-uhabeynta siysadda dhaqaale ee dalka iyo dajinta shuruucda loo baahanyahay taasi oo horseed u ah horumarinta dhaqaale ee dalka iyo abuuuridda jawi ganacsi oo dhiirigalinaya maalgashi.

Dowlad uu hogaamiyo MIDQARAN waxa ay sii xoojin doontaa barnaamijka deyn cafiska oo aan la imaan doonno kartidii lagu muujin lahaa in dalku sameeystay nidaam maamul dhaqaale oo lagu kalsoonaan karo oo muuqda. Waxan si dhaw ula shaqeyn doonnaa hay'adda lacagta aduunka iyo bank-ga aduunka si aan ugu guuleysano in dalka deynta laga cafiyo, awodna u yeesho in kuwo hor leh la siiyo. Deynta Soomaaliya lagu leeyahay waxa ay caqabad ku tahay hirgalinta mashaariic horumarineed iyo in la helo maalgashi caalami ah. Waxan ka shaqeyn doonaa baabi'inta deynta dalka lagu leeyahay iyo dejinta qorshe iyo maamul kalsooni gelin kara shacabka Soomaaliyeed iyo hay'adaha caalamiga oo daneeynaaya in maalgashi ku sameeyaan dalka.

Xisbiga Midqaran wuxuu xukuumadda ka yeeli doonaa mid mudnaanta siin doonta wasaaradaha muhiimka u ah koboca dhaqaalaha, caafimaad iyo aqoonta bulshada Soomaaliyeed. Wasaaradaha waxsoo saarka iyo kobcinta dhaqaalaha iyo wasaaradaha amniga iyo difaaca dalka ka shaqeeya ayaa xukuumaddu muhiimad gaar ah saareeysaa inta Soomaaliya ay ka soo kasbaneeyso xaaladda dhibaateeysan

oo aan shacab ahaan iyo qaran ahaan aan ku jirno. Taa micnaheedu ma ahan in wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee dowladda aysan xasaasi aheyn. Ujeedada dibu habeynta wasaaradaha waxay tahay in ummadda Soomaaliyeed kobcinta dhaqaalahooda iyo noloshoda, sidoo kale sugidda nabadgalyada shacabka oo ay xukuumaddu ay muhimad saareeyso.

Ganacsiga

Ganacsiga Soomaaliya waa mid horumar xowli ah sameynayey mudadii dalku ku jiray xaaladaha adag. Soomaaliya waxa ka jirta isgaarsiinta ugu xooggan geeska Africa, sidoo kale ganacsatada Soomaaliyeed waxa ay dalka ka hirgaliyeen adeegyo aad ukala duwan, waxa ay shaqo u abuureen muwaadiniin badan. Waxan aaminsanhay dhisidda dhaqaalaha wadanka uu saldhig u yahay abuurista suuq xor ah. Dowlad uu hogaamiyo xisbiga MIDQARAN waxa ay hirgalin doontaa siyaasad taageereysa xoojinta ganacsiga dalka. Waxan taageeri doonaa sameysanka ganacsiga yaryar oo aan u aragno mid ka mid ah ilaha shaqo abuurka dalka. Ujeedooyinka xisbiga MIDQARAN waxa ka mid ah in la yareeyo shaqo la'aanta baahsan ee dalka ka jirto, waxan middaas ku gaari karnaa horumarinta ganacsiga dalka iyo dajinta shuruucaha uu suuqu u baahanyahay si loo ilaaliyo hantida muwaadinka Soomaaliyeed korna loogu qaado maalgashiga.

Iswaafajinta Miisaaniyadda Qaranka iyo Siyaasadda Dowladda.

In kasto oo ay miisaaniyadda qaranka koror sameyneysay sanadihii u dhaxeeyey 2012-2019, hadana markii si guud loo fiiriyo miisaniyaddu waa mid loogu talo galay oo keliya bixinta mushaaraadka shaqaalaha iyo kharashaadka xafiisyada dowladda. Si miisaaniyaddu uga turjunto siyaasadda dowladda loona kordhiyo dakhliga dowladda waxan ka shaqeyn doonnaa sidii loogu dari lahaa barnaamij muuqda oo ah maalgashiga arrimaha bulshada iyo kobcinta wax soo saarka khayraadka dalka, sida waxbarashada, caafimaadka, beeraha, xananada xoolaha, kallumaysiga iwm, si

wax dib wax loogu celiyo bulshada una abuurmaan ilo dhaqaale iyo wax soo saar oo cusub taasi oo wax ka badaleysa nolosha qoysas badan oo Soomaaliyeed sidoo kalane kor u qaadeysa dakhliga dowladda.

Dowlad uu hogaamiyo xisbiga MIDQARAN waxa ay u aragtaa lacag kasta oo loo qoondeeya meelaha aan soo sheegnay in ay tahay maalgashi dhismaha qaranka kana qeyb qaadaneyso horumarka dhaqaale iyo bulsho ee dalka. Dhaqaalyahanka adduunka waxay diiradda saaraan marka la rabo in la ogaado horumarka uu wadan sameyey waxaa laga fiiriyaa; i) isbedelka heerka faqriga ii) isbedelka ku dhacay shaqo abuurka; iii) isbeddelka heerka nolosha ee bulshada, waxbarashada iyo caafimaadka. Sidaasi darteed waxan miisaniyadda xoogeeda u qoondeyn doonaa wasaaradaha wax soo saarka si dhaqaalaha dalku u kobco, halka ay hadda ku baxdo qoondada ugu badan hay'adaha maamulka loona adeegsado sahay safar iyo qarashaad xafiis.

Maamul uu hogaamiyo MIDQARAN waxa ay dajin doontaa miisaniyad u diyaarsan in ay baahiyaahaas wax ka qabato. Waxan aaminsanahay siyaasadda dib-u-habeynta misaaniyadda dalka in ay keeneyso kolsooni ay ganacsatada canshuur bixiyaasha ah iyo muwaadiniintuba ku qabaan dowladda, sarane u qaadeyso dakhliga dowladda oo ay awood u heleyso in ay bulshada gaarsiiso adeegyo kala duwan sida fulinta mashaariic horumarineed.

Ilaalinta Bay'ada iyo Deegaanka

Isbeddelka cimilada aduunka ee saameyey dunida waxa uu sidoo kale saameyn culus ku yeeshay wadankeena. Jaridda dhirta iyo dhoofinta dhuxusha waxa ay dalku ku keentay nadaab-guur aan wali hore loo arag sida degdegga ah ee uu ku dhacayo. Waxa yaraaday roobkii, dhul xoog leh oo howd ahaan jiray waxa uu isku badalay saxare, xoolo dhaqata badan oo Soomaaliyeed waxa ka baaba'ay xoolihii ay dhaqanaayeen, dantuna kalliftay in ay qaxooti ku noqdaan maagaalooyin badan oo

wadanka gudihiisa ah, haba ugu badnaato caasimadda dalka. Arinkaasi waxa keenay mudadii dheereyd ee dalku dowlad la'aantu ka jirtay oo aaneey dadkaasi wax daryeel iyo dib-u-dejin ah helin. Xukuumadda hadda dalka ka jirto iyo kuwii ka horeeyeyba waxa ay ka gaabiyeen ilaalinta baya'da iyo deegaanka oo laf dhabar u ah nolosha reer miyiga iyo guud ahaan dalka. Xisbiga MIDQARAN waxa uu aaminsanyahay hadii arrimahaas si xoog leh looga hortagin oo aan olole qaran lagu qaadin in ay keeneyso nabaad guur baahsan oo ka dhaca gayiga Soomaaliyeed. Dowlad uu hogaamiyo MIDQARAN waxa ay howl-galin doontaa hay'adda ilaalinta bay'ada iyo deeganka, waxan si xoog leh ula dagaalami doonnaa dhoofinta dhuxusha iyo baab'inta bay'ada dalka. Waxan hirgalin doonaa shuruuc mamnuuceysa dhoofinta dhuxusha kana dhigeysa danbi heer qaran. Sidoo kale waxan aaminsanahay in bulshadu ay ka qeyb qaadato ka hortaga xaalufinta deegaanka iyada oo ay bulshada rayidka ahi doorkeeda ciyaareyso korna loogu qaadayo wacyiga dadweynaha.

Xisbiga MIDQARAN waxa uu arkaa xaalufinta deegaanka masiibo qaran oo u baahan in miisaankeeda la siiyo lagana soo saaro siyaasad qaran oo looga hortagayo.

Beeraha

Mid kamid ah caqabadaha ugu waaweyn ee ku horgudban horumarka dalka waa wax soo saarka khayraadka dalka oo aad u hooseeya, gaar ahaan beeraha oo ay dad badani ku tiirsanyihiin. Wax soo saarka beeraha oo kor loo qaadaa waxay dalka u horssedeeysaa heerka nolosha shacabka oo kor u kaca, cadadda dadka saboolka ah oo yaraada, iyo sidoo kale waxay horseedeeysaa abuurista bulsho caafimaad qabta oo abuurta suuq lagu kala iibsado waxsoo saarka dalka.

Dowlad uu hogaamiyo MIDQARAN waxa ay hirgalin doontaa siyaasad sare loogu qaadayo wax soo saarka khayraadka dalka waxna looga qabanayo caqabadaha ku horgudban beeraleyda, sida in la qodo webiga laguna sameeyo carra-tuur meelaha uu fatahaadda ka sameeyo si ay u yaraato saameynta fatahaadaha webiga.

Waxaan sare u qaadi doonnaa tayada Wasaaradda Beeraha si ay awood ugu yeelato in ay dejiso qorshaha wax soo saarka beeraha, siyaasadda horumarinta beeraha, cilmi-baaris lagu sameeyo beeraha iyo sidoo kale tababaro loo sameeyo beeraleyda. Waxan dhiiri gelin doonnaa maalgashi lagu sameeyo wax soo saarka beeraha dhul-beereedka dalka. Waxaan ka shaqeyn doonaa in aan wax ka qabano fatahaadda wabiyada sidoo kale in aan ka shaqeyno hirgalinta warshado yar-yar oo warshadeeya khudaarta dalka si loo gaarsiiyo meelo fog fog loogana faa'ideeysto xilliyada abaaraha ee wax soo saarku uu hoos u dhaco.

Beeraleyda dalka waxa ay dhib badan ku qabaan sidii ay u heli lahaayeen miraha kala duwan ee abuurka, waxan suuragalin doonaa sidii beeraleydu ugu heli laheyd miraha ay u bahaanyihiin qiimaha ugu macquulsan aysan dhicin in la waayo nooc ka mid ah abuurka dalka.

Si wax soo saarka dalka sare loogu qaado waxan u aragnaa in ay muhiim tahay in la helo qalabka sahlaya wax so saarka sida qalabka waraabka iyo noocyada kala duwan ee kale oo ay u baahanyihiin beeraleyda.

Dowlad uu hogaamiyo MIDQARAN waxa ay muhimadda siin doontaa wasaaradaha wax soo saarka kheyraadka dalkeena oo ay ugu horreyso wasaaradda beeraha.

Kaluumeysiga

Kheyraadka dalka uu kamid yahay kaluunka waa mid ay wadaagaan dhamaan umadda Soomaaliyeed oo ay ugu horreeyaan dhalinyarada oo ah jiilka mustaqbalka. Kaluumeysiga xad-dhaafka ahi waxa uu keenayaa xaalufinta badda Soomaaliyeed. Xisbiga MIDQARAN waxa uu ballan qaadayaa kobcinta, ilaalinta iyo badbaadinta kheyraadka dalka. Dowlad uu hogaamiyo MIDQARAN waxa ay dib u eedis ku sameyn doontaa dhamaan shatiyada iyo heshiisyada lala galay shirkadaha shishiiye, waxaan dib u eegis ku sameyn doonaa sharciyadda haga dhamaan heshiisyadaas iyo maslaxadda qaranka. Si gaar ah waxan dib u fiirin doonnaa heeshiiska ay dowladdu

la gashay shirkado shiinees ah oo aan loo saarin khuburo Soomaaliyeed oo ka tala bixiya heshiiskaas Xisbiguna aaminsanyahay in ay khatar ku tahay nolosha iyo jiritaanka kheyraadka baddeena.

Si looga hortago kaluumeysiga sharci darada ah ee baddeena, waxaa muhiim ah dhisidda ciidan qalabeeysan oo tababaran oo illaliya baddeena. Waxan u aragnaa arintaan in ay muhiimad gaar ah u leedahay ummadda Somaaliyeed. Dowlad uu hogaamiyo xisbiga MIDQARAN waxa ka go'an helidda ciidan u dhameystiranyahay qalabka uu u bahanyahay si uu u guto waajibaadkiisa howl inaga oo kaashaneyna dowladaha saaxiibka nala ah ee ka saacida taageeridda dhanka dib-udhiska ciidanka.

Waxan xoojin doonaa iskaashatada kaluumeysatada dalka oo aan ka taageeri doono in ay helaan taakuleyn dhan walba ah iyo suuqgeyn dalka iyo dibadda ah oo ay wax soo saarkooda geeyaan.

Si loo yareeyo faqriga, iyo shaqa la'aanta ba'an ee dalka ka jirta, waxan soo saari doonaa siyaasad lagu dhiirigalinayo maalgashi shisheeye, si aan uga faa'ideysano kheyraadka dalkeena uuna noqdaa mid xaaladda nolosha muwaadiniinta wax ka badala, shirkadaha shisheeye waa in ay ka furtaan warshado dalka gudihiisa ay ku diyaariyaan, kuna gasacadeeyaan kalluunka ay kasoo saarayaan badeena si looga helo shaqa abuur bulshada ka faaideeysato loogana maarmo malaayga gasacadeysan ee aan dibadda kasoo dhoofsano.

Wasaaradda kaluumeysigu waa mid ka mid ah wasaaradaha khayraadka dalka ka shaqeeya oo aan xoogga saari doonno haddii Allah ka raalin noqdana saameyn baaxad leh ku yeelan doonta horumarinta heerka nolosha bulshada.

Xanaanada xoolaha

Xoolaha nool waa mid kamid ah tiirarka dhaqaalaha Somaaliya. Waxa ku tiirsan tiro aad u badan oo bulshada Soomaaliyeed ah oo caano ka lista, hilib ka cuna, iibiya

hilbkiisa iyo xubnahiisaba, ku guura, sidoo kalana ayakoo nool iibgeeya oo uu dakhli kasoo galo. Si sare loogu qaado wax soo saarka xoolaha Somaaliya dowlad uu hogaamiyo MIDQARAN am aka tirsan yahay waxa ay ka taageereysaa sidii loo soo nooleeyn lahaa daryeelka kobcinta iyo caafimaadka xoolaha oo daawo loogu heli lahaa xoolaha maadaama mudooyinkii danbe ay kordheen cudurada ku dhaca xoolaha taasi oo keenta in hoos u dhac ku yimaado dhoofinta xoolaha. Sidoo kale anaga oo kaashaneyna hay'adaha aan dowliga aheyn ee caalamiga ah (NGOs) iyo deeq bixiyaasha, waxa aan suuragalin doonaa in ceelal biyood laga hirgaliyo meelaha fog-fog oo dadku degaan oo aysan wabiyadu marin si wax looga qabto biya yaraanta dalka ka jirta.

Dowlad uu hogaamiyo MIDQARAN waxa ay xoogga saari doontaa sidii dib-uhabeyn loogu sameyn lahaa wasaradda Xanaanada Xoolaha loona tayeyn lahaa shaqalaaha wasaaradda, dhakhaatiirta xoolaha, dugsiyada iyo jaamicadaha lagu barto cilmiga xoolaha iyo wax soo saarkooda iyo sidoo kale dejinta qorshaha fog ee wasaaradda ee lagu kobcinayo suuqyada hadda loona abuuro suuqyo cusub iyadoo MIDQARAN xalin doonto haddii Allah ka raali noqdo dhamaan shuruudaha hortaagan in la helo suuqyo cusub.

Macdanta iyo Shidaalka

In kasto oo dalkeena lagu tiriyo inuu ka mid yahay dalalka hodanka ku ah qeyraadka, hadane nasiib darro dadkeenu kama faa'ideysan. Marxaladihii kala duwanaaa ee dalku soo maray sida dagaaladii sokeeye iyo dagaalka kooxaha xajirka ah lagula jiro kaasi oo cuuryaamiyey in shacabka Soomaaliyeed ay ka faa'ideystaan qeyraadka uu rabi ku maneystay ee uu ugu horeeyo shidaalka. Colaadahaas iyo daganaasho la'aantaasi waxa ay kalifeen in bulshada inteeda badani ay la daalaa dhacdo baahi iyada oo qeyraadkaas heysato.

Xisbiga MIDQARAN waxa uu aaminsanyahay in bulshada Soomaaliyeed looga faa'ideeyo qeyraadka dalka ku jira sida macdanta iyo shidaalka, kaasi oo wax badan ka badalaya xaaladda nololeed ee liidata oo qeyb ka ah amni darida dalka ka jirta. Xisbigu waxa uu uga soo horjeedaa xukumadda talada heysa qaabka loo marayo soo saaridda qeyraadka dalka oo aad moodid in shacabkii Soomaaliyeed laga qarinayo heshiisyada ay xukumaddu la gashay shirkadaha shisheeye ee u tartamayo soo saaridda shidaalka. Waxan aaminsanahay in bulshada loosoo bandhigo heshiis kasta ee la xiriira qaabka ay shirkadaha shisheeya ee soo saara ay noola wadaagayaan qeyraadkeena sidoo kale in laga qeyb galiyo quburo Soomaaliyeed oo ay kasoo talo bixiyaan sida danta ugu jirto dalkeena oo aysan noqon in shaqsiyaad kooban ay go'aan ka gaaraan arin masiiri ah oo la xiriirta mustaqbalka umadda.

Dowlad uu hogaamiyo ama uu qeyb ka yahay MIDQARAN waxa ay dhameystiri doontaa dhamaan shuruuca loo baahanyahay ka hor inta aan laguda galin howsha soo saaridda shidaalka dalka. Waxan xooga saari doonaa dib-u-dhiska iyo dib-u-habeynta wakaaladii shidaalka dalka iyo wasaaradda macdanta iyo batroolka.

Tiirka 6aad: Siyaasadda

Dhameystirka Dastuurka

Si looga fogooda qilaafka siyaasadeed ee soo noqnoqda kaasi oo la xiriira arima dastuuri ah isla markaana cuuryaamiyey howlihii ay dowladdu u qaban laheyd shacabka, waxan xooga saari doonaa dhameystirka Dastuurka taasi oo ay ka qeyb qaadan doonaan dhaman bulshada Soomaaliyeed iyadoo la hiigsaanaayo in sannadka 2020ka ay dhacdo doorasho hal qof hal cod (one man one vote).

Dastuurka dalka waa kan isku hayo ummadda Soomaaliyeed, si loo helo xasilooni siyaasadeed loogana fogaado in ummadda Soomaaliyeed dib ay ugu laabato marxaladdii xumaa ay soo martay, waxan si qoto dheer ah uga fiirsan doonnaa dib ugu noqoshada dastuurka dalka iyo inuusan noqon mid ku cusub shacabka ee uu noqdaa mid ka turjumaya maslaxadooda guud iyo ilaalinta qaranimada, diinta iyo dhaqanka soo jireenka ah ee umadda Soomaaliyeed.

Dib-U-Heshiisiin Dhab Ah

Shacabka Soomaaliyeed waa umad wadaagta dhaqan, luqad, diin, midab iyo xiriir wada-dhalasho kana soo kala jeeda qabaa'ilo kala duwan. Shacabkeenu inta uu ku kala duwanyahay waxa ka badan inta uu ka mideysanyahay. Marka loo eego wadamo badan ee caalamka waxa la dhihi karaa shacabka Soomaaliyeed waa dad isku mid ah oo aan waxba ku kala duwaneyn.

Sidaasi daraadeed heerka aqoonta bulshada guud ahaan oo aanan sare loo qaadin iyo nidaamka siyaasadda dalka oo ku dhisan qabiilka ayaa keenay in bulshada lagu kala qeybiyo qaab qabiil oo uu siyaasi dano gaar ah leh umadda ku kala geeyo ugu danbeyntiina sababtay inuu dhaco dagaal sokeeye.

Xisbiga MIDQARAN isaga oo maanka ku haya in bulshada Soomaaliyeed ay yihiin dad walaala ah oo is jecel, wax bandanna wadaaga cadowgoodana meel uga soo wada jeesta, waxa uu soo bandhigayaa siyaasad qaran oo dib-u-heshiisiin ah kaasi oo xooga lagu saarayo in siyaasadda dalka dib looga heshiiyo sidoo kalana la dhameystiro dastuurka iyada oo dhamaan bulshada Soomaaliyeed ku wada qanacsanyihiin. Waxaan aaminsanahay in aysan jirin dhibaato baaxad leh u dhaxeysa bulshada Soomaaliyeed in kasto oo ay jiraan dad tirsanaya xad gudubyo loo geeystay xiliyo kala duwan. Waxaan ka shaqeyn doonnaa sidii dib-u-heshiisiin dhab ah iyo cafis walaaltinimo loo dhex dhigi lahaa umadda Soomaaliyeed. Sidoo kale waxan ka shaqeyn doonnaa sidii dalku u yeelan lahaa shuruuc ilaalisa xorriyadda shakhsiga oo ay dadku u simanyihiin iyo cadaalad si looga gudbo ku tiirsananta uu muwaadinku ku tiirsanyahay qabiilka.

Siyaasadda Xukuumadda ee Arrimaha Masiiriga ah

Maamulka Dowladda

Nidaamka Federaalka

Qaranka Soomaaliyeed waxaa lagu magacaaba Dowladda Federaalka Soomaliya, oo macnaheedu yahay in Soomaaliya ay tahay dal si ku meel gaar ah ugu dhaqmaaya nidaamka federaaliga ah ilaa afti shacbiyeed la geliyo oo ummadda Sooomaliyeed ay si dhab ah u qaataan am aka noqdaan.

Inta afti dadweyne laga gaarayo, waxa muhimadda saareynaa ilaalinta dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka u yaala si la isugu keeno umadda Soomaaliyeed loona gaaro nidaam dowladeed oo la mid ah kuwa caalamka ka jira.

a) Inta ka horreeysa, masuuliyadda dowladda saaran waxay tahay in si hagar la'aan ah loogu dhaqmo dastuurka qaranka, loona socodsiiyo barnaamijka dardargelinta geedi socodka loogu jiro in uu dalku gaaro hal cod iyo hal qof sannadka 2020. Hadaba xaalado amni iyo dhameystirka dastuurka oo ay ka gaabisay dowladda hada jirtaahi, uma muuqato in xukumadda hada jirtaa ay uga soo baxeyso sidii la qorsheyey 2016 ee dhameystirka dastuurka iyo in lagaaro doorasho qof iyo cod ah 2020. Hadii ay xukumaddu ku guuleysan weyso in ay gaarsiiso dalka qof iyo cod sannadka 2020, dowlad ay hogaamiso Xisbiga Midqaran waxa ay degdeg u dhameystiri doontaa dastuurka dalka gaarsiina doonta dalka doorasho xor ah oo hal cod iyo hal qof ah sida ugu dhakhsiyaha badan.
b) Dowlad goboleedyadu waa in sida waafaqsan dastuurka lagula dhaqmo, lalana yeesho wada shaqeyn iyo kalsooni keeni karta in uu dalku isla jaanqaado. MIDQARAN waxa uu aaminsanyahay si umadda Soomaaliyeed looga saaro xaaladda cakiran in dowladda dhexe iyo dowlad

gobaleedyadu kawada shaqeeyaan sidii loo dhameystiri lahaa shuruucda dowladnimada Soomaaliya iyada oo sidoo kale ay ka qeyb qaadanayaan dhamaan bulshada rayidka qeybaheeda kala duwan.

c) Xisbigu wuxuu qabaa in magaca madaxweyne laga bedelo hoggaamiyayaasha dowlad goboleedyada loona daayo magaca madaxweyne, madaxweynaha qaranka Soomaaliyeed. Magacyada sida hoggaamiyaga dowlad goboleedka, iyadoo oo eray bixin lagu sameynayo magacyada ay tahay in ay qaataan heerarka kala duwan ee maamulada si loo yareeyo is-barbar-yaac iyo madaxweynayaal meel ku kulmaya qaarna yihiin dowlad goboleedyo, midna yahay madaxweynhii qaranka Soomaaliyeed.

Maqaamka Magaaalada Muqdishu iyo Xuquuqda Shacabka ku nool Gobolka Benaadir

Xisbiga MIDQARAN wuxuu aaminsan yahay in shacabka Muqdisho iyo gobolka benaadir lagu tacadiyey oo aan xuquuqdooda muwaadinnimo aysan ka helin dowladda federaalka Soomaaliya. In aysan shacab ku dhow saddex million aysan cod ku yeelan golaha shacabka iyo golaha senate-ka waa Aayaan darro iyo siyaasad xumi aan daacad laga ahayn. Xisbiga MIDQARAN wuxuu u istaagayaa ka miro dhalinta iyo xaqiijinta xuquuqda shacabka Soomaaliyeed ee ku nool Gobolka Benadir sidii ay u heli lahaayeen metelaad dhab ah oo ah golaha Shacabka iyo aqalka sentate-ka, isla markaana maqaamka caasimadda Soomaaliya xal lagu mideeysan yahay loo helo.

Sidoo kale waxan aaminsanahay in shacabka ku nool magaalada muqdisho ay soo doortaan cidii iyaga maamuli laheyd heer gobol iyo heer dagmo.

Laamaha Dowladda

a) Sida dastuurka uu qabo waa in Soomaaliya ay leedahay saddex hay'adood oo ugu sareeya dalka oo kala madaxbanaan, isuna dheeli tiran, sida:
    i. Golaha Fulinta
    ii. Golaha Sharci Dejinta
    iii. Goaha Garsoorka.

b) Xisbiga Midqaran wuxuu dib-u-habeyn ku sameeyn doonaa Golaha Shacabka iyo Golaha Garsoorka oo lagu takri falay madaxbanaanidooda si dadbanna looga maamulo golaha fulinta

c) Xisbigu waxa u mamnuucayaa in ay isku milmaan golaha fulinta iyo golaha sharci dejinta sida xukuumadda hadda jirta ay sameeysay. Sidaa darteed xildhibaan xil ka haaya golaha shacabku maka hawl geli karo xil kalena kama qaban karo golaha fulinta sida keliya ay taas ku dhici karto waa in uu qofku lumiyaa xilka uu ka haayey golaha shacabka si uu xil kale uga qabto golaha fulinta ama golaha garsoorka.

d) Si loo xaqiijiyo kala madax-banaanida golaha sharci dajinta iyo fulinta, xisbiga MIDQARAN waxa uu soo jeedinaa in golaha sharci dajinta howlahooda kor-joogteynta ay noqoto mid baaxad leh si joogta ahna ula socdaan su'aalana ka weydiiyaan golaha fulinta howlaha socda.

Xal-uhelidda qadiyadda walaaleheen ee Somaliland

Mabaadi'da Xisbiga Midawoga Qaranka Soomaaliyeed waa helitaanka **qaran Soomaaliyeed oo MID ah oo ay dadkiisu ku noolyihiin walaaltinimo, nabad-galyo, cadaalad iyo barwaaqo.** Si midaas loo xaqiijiyo, dowlad uu hogaamiyo xisbiga MIDQARAN waxa uu cilmi baaris hufan ku sameeyn doonaa taariikhada midowga waqooyi iyo koofur iyo dhibaatooyinka u horseeday dagaaladii magaca qaranka lagu galay ee waqooyi iyo waqooyi bari, dagaaladii sokeeye ee koofur iyo

isbedeladii dhacay mudadii dawladdu burbursaneeyd. Xisbigu waxaa uu soo jeedinaayaa in wadahadal furan oo walaaltinimo ku dhisan laga galo sidii xal waafi ah looga gaaro dhibaatooyinka ay tirsanaayaan waalaheena reer Soomaaliland. Xisbigu waxa uu qabaa in arrinka Somaliland aan wali la siinin muhiimaduu lahaa, loona baahanyahay dowlad keenta aragti labada dhinac ay kuwada hadlaan iyaga oo walaalo ah si wada jir ahna uga wada tashada masiirkooda mustaqbalka dhow iyo kan fog.

Xiriirka Caalamka

Dowlad uu hogaamiyo MIDQARAN waxa ay dajin doontaa siyaasad dhexdhexaad ah iyo istraatiji salka ku haaya maslaxadda qaranka Soomaliyeed iyo adkeeynta xiriirada caalamiga ah, iyo sidii aan ula falgali laheyn wadamada deriska iyo kuwa caalamkaba. Soomaaliya waa waddan muddo kusoo jiray dagaalo sokeeye iyo dowlad la'aan kuna jiro marxaladii dibudhiska dalka, annaga oo middaaaas ka duuleyna waxan kula dhaqmi doonaa siyaasad iyo wada shaqeyn la jaanqaadi karta isbedellada adduunka ka dhacay iyadoo islamarkaa horumarineesa maslaxadda qaranimada Soomaaliyeed.

Si gaar ah waxan kawada shaqeyn doonnaa dowladaha deriska ah sidii loola dagaalami lahaa kooxaha argagaxisada, looguna dabbaali lahaa nabad-galyo geeska Africa, xiriir wada shaqeyn ku dhisanna uu inoo dhex mari lahaa. Waxan si dhaw ula shaqeyn doonaa dowladaha taageera Soomaaliya annaga oo xaqiijin doona in taageeradoodu ay noqoto mid wax ka bedesha nolosha dadka Soomaaliyeed annaga oo dajin doona siyaasadda maareynta gargaarka bani'aadamino iyo midda kobcinta khayraadka dalka oo looga kaaftoomi karo taakuleeynta ban'iaadannimo. Waxaan is waafajin doonaa kaalmada dibadda inooga timaado iyo qorshaha horumarinta dhaqaalah dalka.

Dowlad uu hogaamiyo Xisbiga MIDQARAN waxa ay dib-u-habeyn xoog leh ku sameyn doontaa siyaasadda arimaha dibadda midaas oo sal-dhig u ah in Somaaliya ay kula dhaqmi doonto dowladaha deriska ah siyaasad wada shaqeyn iyo gacan saar derisnimo iyada oo la ilaalinayo qaranimada Soomaaliya.

Xisbiyada Siyaasadeed

Xisbiyada siyaasadeed waxaa loo aqoosan doonaa in ay yihiin halka lagu muujinayo rabitaanka siyaasadeed iyo ujeedada muwaadiniinta. Maadaama ay yihiin tiir kamid ah tiirarka dimoqoraadiyadda, xisbiyadu waxa ay abuurayaan qaab-dhismeedka muhiimka u ah ka qeybgalka muwaadiniinta geedi-socodka siyaasadeed ee uu dalku ku jiro. Dowlad uu hogaamiyo xisbiga MIDQARAN waxa ay taageeri doontaa in axsaabta dalka ay si xor ah ugu soo bandhigan karaan dhaqdhaqaaqooda siyaasadeed taasi oo xisbiga MIDQARAN u arko in ay tahay mid kamid ah tiirarka ay ku taagantahay dowlad-dhisidda iyo degenaansha siyaasadda dalka ayna tahay xuquuq uu dastuurka dalku siinayo Xisbi kasta oo afkaar gaar ah ku dhisan rabana in uu ka talo bixiyo mustqbalka siyaasadda Soomaaliya.

Bulshada Rayidka

Waxaan shaki ku jirin in ururada bulshada Soomaaliyeed ay ahaayeen laf-dhabarka isbeddelada lagu dejinaayey dalka laguna abaabulay dibudhiska qaranka Soomaaliyeed. Hase ahaatee, dowrka rasmiga ay bulshada ugu jireen aanan lagu qadarin oo xukuumaduhu ay u arkeen kuwa aan qeyb aheyn horumarinta buslada Soomaliyeed.

Xisbiga MIDQARAN waxa uu qiri doonaa dowrka dhaxalgalka ah ay ururada bulshadu kaga jireen geedi socodka dalka, isla markaasna ay noqon doonaan kuwa qeyb muhiim ah ku leh ka talobixinta iyo abaabulka siyasadda iyo horumarka umadda Soomaaliyeed. Xisbigu wuxuu aaminsanyahay in ururada bulshada qeybaheeda kala duwani ay si dhaw ula socdaan duruufaha ku gadaaman bulshada Soomaaliyeed iyadoo xukuumaddu ka taakuleyn doonto in ururadu ay noqdaan

kuwo maslaxadda ummadd ka tarjuma, kartideeda iyo wax qabadkeedana leh. Dowlad uu hogaamiyo Xisbiga MIDQARAN waxa uu taageerayaa ururada bulshada sida noocyadeeda kala duwan sida ururada haweeenka, ururada dhalinyarada, ururada shaqaalaha, iyo qeybaha kale ee ururada bulshada dalka ka jiro. Ururada bulshada rayidka ahi waa halkii laga heli lahaa macluumaadka lagu dhisayo siyaasadda arrimaha bulshada iyo masiirkooda qarameed.

Waxan dhiirigalineynaa oo aan taagereynaa waxbarashada madaniga ahi (civic education) iyada oo la aasaasayo hay'adda waxbarashada madaniga ah ee qaranka. Sidoo kale iyada oo loo maraayo xarumaha waxbarashada dalka iyo xisbiyada siyaasadda si muwaadiniintu ay u ciyaari karaan door firfircoon xagga horumarinta siyaasadda iyo guud ahaan dalka. Muwaadiniintu markii ay helaan waxbarasho madani ah waxa ay ka hortagaan in madaxdu si qaladan awooda ugu takri fasho iyo in ciidamada qalabka sida ay siyaasadda soo dhexgalaan.

Saxaafadda

Saxaafaddu waxa ay dowr muhiim ah ka ciyaartaa sidii loo xoojin lahaa kala warqaadashada bulshada iyo xukuumadda iyo horumarinta nidaamka awood talowadaagga ee loo yaqaan dimoqoradiyadda. Saxaafadddu waxa ay masu'uul ka tahay in ay wargaliyaan sidoo kale baraan shacabka iyo dowladdaba xaaladaha kala duwan ee ka jira dalka iyo dibeddaba soona bandhigaan dareenka shacabka oo ku aaddan xaaladooda bulsho iyo waxqabadka xukuumadda.

Waxan taageeri doonaa oo dhiiri galineynaa saxaafadda xorta ah in ay tahay tiir ka mid ah tiirarka ay dimoqoradiyaddu ku taagantahay. Dowlad uu hogaamiyo xisbiga MIDQARAN waxa ay ka qaadeysaa dhamaan xayiraadaha aan saxda aheyn ee saaxafadda madaxa banaan sidoo kale shuruuc ka dajineysaa xariga lagula kaco saxifiga. Xisbigu waxaa kaloo aaminsanyahay in xukuumaddu ay soo saarto shuruuc haga saxaafadda, kuwaas oo ilaaliya anshaxa (ethics) warbaahinta iyo in lagula

xisaabtamo xadgudubyada ay sameeyaan qaar ka mid ah shaqaalaha iyo madaxda saxaafadda. Si taa loo socodsiiyo xisbigu wuxuu soo jeedinaayaa in la sameeyeo Guddiga Saxaafadda Qaranka kaasoo si madax banaan u maamuli doono sharciyeeynta iyo xakameeynta ku xadgubudbka asluubta saxaafadda. Sidoo kale dib-u-habeynta in madax banaaneynta laamaha cadaaladda si ay ugu kala baxaan saxaafadda iyo xukumadda si cadaalad ku dhisan oo aan cidna u eexaneyn.

Tiirka 7aad: Maamul Wanaagga

Dib-U-Habeynta Hay'adaha Dowladda

Nidaam maamul wanaag waa waxa adduunku isku qadariyo. Dhakhsiyaha hawsha loo guto iyo firfircoonida ka muuqato hawl qabadka waxay keentaa in ay soo celiso kalsoonida shacabka iyo macaamiilka kale ee caalamiga ah. Waqtiga oo la dhowro, shaqada oo si hufan u socoto, iyo tixglein la siiyo muwaadhinka in hawshiisa loo fudueeyo waxay ka mid tahay waxyaabaha mujinaaya maamul wanaagga dowladda. Xafiisyadu waa in aysan isbaaro dhigan hawsha looga baahan yahay oo waqti cayiman ku gudbiyaan hawsha laga rabo si xawliga hawl qabadka qaranku uu ku socdo sidii loogu talo galay. Xisbigu waxa uu soo soo jeedinaayaa in la waqtiyeeyo hawlaha shacabka loo qabanaayo, oo haddii mudada la dhaafo, hawshaasi ay u gudbeeyso xafiiska ka sareeya oo masuulka ka ah hawshaas. Taasi waxay horseedeeysaa in shaqaalaha dowladda iyo shacabkaba ay yaqaanaan inta ay qaadan karto hawshaas.

Hay'adaha dowladda waxa ay u xilsaaranyihiin in ay si xirfadeeysan oo tayo leh u gaarsiiyaan adeegyada kala duwan ay dowladdu u qabato shacabka. Si ay dowladdu u gudato howlaheeda qaran waxa aan ka shaqeyn doonnaa dib-u-dhiska iyo tayeynta maamulka iyo qaab dhismeedka hay'adaha dowladda. Tayada hay'adaha waxa ay laf dhabar u yihiin ololaha la dagaalanka musuqmaasuqa iyo soo celinta kalsoonida shacabka ay dowladooda ku qabaan.

Dowlad uu hogaamiyo xisbiga MIDQARAN waxa ay diiradda saari doontaa dib u habeynta qaab-dhismeedka dowladda iyo sare u qaadida xirfadda iyo aqoonta shaqaalaha dowladda. Xisbigu wuxuu muhimadda siin doonaa in shaqada dowladdu ay ku xiran tahay aqoonta iyo kartida qofka shaqaalaha ah lagana gudbo mabadidi dib noo dhigtay ee ku saleeyneed nidaamka awood qeybsiga 4.5. laguna dooranayo qofka shaqaalaha ah si sinnaan iyo cadaalad ku jirto aqoontiisa iyo xirfadda uu u leeyahay inuu howshaas u guto isla markaas iyada oo tixgelinaayo in umaddu ay u simantahay fursadaha dalka.

La dagaalanka Musuqmaasuqa

Musuqmasuqu waa nidaam aan diin, dhaqan iyo xadaarad midna aan lagu amaanin. Waa dhaqan xumo u horseedeeysa bulsho in ay kala daadato oo aysan helin nidaam iyo cadaalad iyo kalsooni ay ku qabaan hayadahooda sharciga iyo midka dowliga. Muddo Qarni ka hor ayaa laga soo weriyey in uu Sayid Mohamed Abdille Hassan uu yiri “Musuqmaasuq waa Soomaali meheredeed”.

Soomaliya xiligan casriga ah waxa ay wali kasoo muuqataa sanad kasta liiska waddamada ugu musuqmaasuqa badan dunida, waloow ay taasi sabab u noqon karto in Soomaalidu ay musuqmaasuq ku sheegaan wax Alle wixii aysan raali ka ahayn, si fududna u gudbiyaan. Musuqu waa cadawga horumarka umadda Soomaaliyeed, waxa uuna keenaa inuu daciifiyo hay’adaha dowliga ah, shaqo la’aanta oo kororta, faqriga oo bata, adeega bulshada loo qabto oo meesha ka baxda, xasilooni darida oo kororta sidoo kale kalsoonida ay shacbku ku qabaan dowladooda oo iyadan yaraata ama meesha ka baxda.

Waxaan shaki ku jirin dhaqanka Soomalida in uu u nugul yahay musuqmaasuqa oo qof waliba rabo in uu bixiyo hawl fududeyn si uu dhakhsi ku helo hawlaha uu xaqa u leeyahay. Diinta Islaamka iyo xadaaradda caalmkaba si weyn bay uga soo horjeedaan musuqmaasuqa oo ayna kula diriraan. Si looga hortago musuqmaasuqa

waa in marka hore shaqaalaha dowladda iyo hay'adaha la xiriiro helaan mushaharaad ay kaga kaftoomi karaan, in ay ku qancaan mushaharkooda oo si sharaf iyo karaamo leh ay ugu noolaan karaan.

- Xukummaddu waa in ay xakameeysaa sicir bararka iyo waxyaabaha qiime tiraayaa lacagta qaranka ama shilin Soomaaliga si loo ogaado qiimaha maciishadda iyo awoodda dhaqaale ee shacabka.
- Waa in ay jirtaa hay'adda la dagaalanka musuqmaasuqa oo ka shaqeeya ka hortagga musuqmaasuqa oo la shaqeeya hay'adha dowliga iyo kuwa shacbiga ah;
- Waa in shacabka Soomaaliyeed wacyigiisa ku saabsan musuqmaasuqa la bedelo oo la baro in nidaamka la dhowro oo loo sinnaado si loo gaaro nidaam dadka kala haga oo lagu kalsoonaan karo.

Sidoo kale ujeedooyinka xisbiga waxa ka mid ah dhisidda hay'adda aan kor kusoo sheegnay ee la dagaalanka musuqmaasuqa iyada oo ay si guud uga wada qeyb qaadanayaan saraakiisha dowlada, shaqaalaha rayidka ee dowladda, bulshada rayidka ah iyo warbaahinta madaxa banan.

Wax ka qabashada musuqmaasuqa waxa ay inoo leedahay mudnaan gaar ah. Si wax looga qabto, waxan hirgalin doonaa hanaanka ay qolo waliba doorkeeda ka ciyaari doonto iyada oo ugu horreyso in aan laamaha cadaaladda dib-u habeyn lagu sameyno si ay doorkooda ah in cadaaladda la sugo ay u gutaan si hufan oo shacabka kalsooni gelisa.

Dowrka la dagaalanka musuqmaasuqa ee madaxda iyo	Dajinta iyo hergelinta sharciga la dagaalanka musuqmaasuqa iyo in la isticmaalo baarayaal madax banaan si loo xaqiijiyo howlaha xafiisyada
	Xoojinta demuqoraadiyadda iyo kala madax-banaanshaha laamaha fulinta, sharci dajinta iyo cadaaladda

shaqaalaha dowladda	Gaarsiinta hay'adaha cadaalada heer ay ku kalsoonaan karaan muwaadiniintu in hawlaha cadaaladda ku galaan si sharciga waafaqsan loona simanyahay.
	Shacabka iyo shaqaalaha dowladda oo ku dhiirada laguna abaal mariyo in ay soo sheegaan falalka musuqmaasuqa oo la taaban karo oo aan ahayn "waa la yiri: ee shaqalaha iyo madaxdoodaba.
Dowrka Bulshada Rayidka	Ku dhiiri galinta xukuumadda in ay u hogaansantay sharciga ladagaalanka musuqmaasuqa.
	Baridda shacabka doworka xukuumadda ee la dagaalanka iyo baabi'inta musuqmaasuqa.
	Qabashada doodo ku saabsan dhaqamada horseeda musuqmaasuqa iyo siyaabaha loola dagaali karo.
Doworka Saxaafadda	Soo bandhigidda dadaalka xukuumadda ee hirgalinta sharciga la dagaalanka musuqmaasuqa iyo ka gaabiskaba.
	Sheegidda falalka musuqmaasuq ee dhacaya iyaga oo soo bandhigaya macluumaad dhab ah
	La shaqeynta ganacsatada si ay usoo tabiyaan howlaha iyo shaqooyinka ganacsatada iyo cabashadooda
	La wadaagidda bulshada howlaha qandaraas bixinta ee dowladda
	Baridda bulshada in aysan ka qeyb qaadan falal musuqmaasuq

Xisbiga Midowga Qaranka Soomaaliyeed (Midqaran)

National Union Party of Somalia

Mogadishu, Somalia

©2019

All Rights Reserved ™

info@midqaran.org

-Dhammaad-